Xaashida Xaqiiqada AMAANKA ee gubashada hore

Fahmida gubashada iyo dhibaatada dhaawaca dabka

Gubashadu waa waxyaallaha ugu xun oo gaara jirka aadamiga. Ka sokow xanuunka, dhaawaca ilmaha yari waxaa laga yaabaa inuu maqaarka ka fiiqmo, keeno iscuncun, nabar yeesho, go'o, bedelo qaab jireedka ama uu ku reebo rafaad shucuureed. Silica jireed iyo kan shucuureed ayaa noqon kara mid aan suurin weligiis. Dhaawacu wuxuu waxyeellayaa qoyska oo dhan, dhinaca shucuureed iyo dhinaca dhaqaale waqtiga dhow iyo waqtiga dheerba.

Ma ogtahay?

- Gubashooyinka iyo dhaawaca dabka badankiis wuxuu ka dhacaa guriga
- Carruurta ka yar shan sano ma aqoonsan karaan khatarta
- Carruurta ka yar shan sano waxay u khatar ugu jiraan gubashada /dhaawaca dabka
- Gubashada / dhaawaca dabka waa laga hortegi karaa

Waxa keena gubashada

DHAAWACA GUBASHADA: biyaha kulul sida shaaha iyo kafeega dhibcahooda, cuntada kulul, suxuunta, tuubada kulul iyo qubayska.

KU GUBASHADA OLOLKA: ku gubashada ololka qaawan sida dab furan, kibriit, laytarka sigaarka lagu daaro iyo sigaarka.

KU GUBASHADA TAABASHADA: taabashada waxyaalla kulul sida kulayliyaha, istoofka, oofanka iyo baarbakiyuuga.

Gargaarka degdeg ah ee gubashada

Jooji habka gubida

- Iska bixi dharka, haddii aanu dharka kugu dhegin

Qabooji meelaha gubtay

- Geli kuna shub meelaha gubtay biyo qabow oo socda 15 ilaa 20 daqiiqo
- Weligaa ha isticmaalin saliid, subag ama duhun (ointment)

Dabool

- Dabool gubashada kuna nadiifi maro ama duub ilmahana kululay

Qiimay

- Arag dhakhtar haddii dabku yahay wajiga, gacmaha, lugta, xiniin ama guska, go'san yahay ama nabarku ka dheer yahay cabirka 20 santi

Telefoonka degdega ahi waa 000 ambalansida.

Macluumaad intaas ka badan:

Kidsafe
www.kidsafevic.com.au

Royal Children's Hospital
www.rch.org.au

Country Fire Authority (CFA) iyo Metropolitan Fire and Emergency Services Board (MFB) ayaa waxay ka dhigeen macluumaadkaan mid la helli karo iyada oo fahamku yahay inaad aad uga taxadarto markaad isticmaalayso. Haddii aad wax shaki ah ka qabto sida uu u saamaynayo isticmaalida macluumaadkani xaalladaada gaarka ah, waa inaad raadisaa talo milhnadeed oo intaas ka badan. CFA iyo MFB ma aqbalayso masuuliyada sidaad u isticmaasho macluumaadka la bixiyey. CFA iyo MFB ma aqbalayaan masuuliyada wixii dhib ah oo ka yimaada sida loo isticmaalay macluumaadkaan, ha u noqoto qalad aan looga jeedin, qalad ama wax laga tegay ama sabab kale oo kasta.

Macluumaad intaas ka badan la xiriir:

CFA
www.cfa.vic.gov.au

MFB Protecting Our Community
www.mfb.vic.gov.au